## Sida loo noqdo

# Kaaliyaha Daryeelka Gaarka ah

### Hagaha Tallaabo-ka-Tallaabada ah

Taageer dadka qaba baahiyaha caafimaadka dhimirka iyo habdhaqanka.

**Jiheeyeyaasha Bixiyaha ayaa halkan u joogo inay ku caawiyaan.**

Waxay kaa caawin karaan tallaabo kasta oo ah geedi-socodka diiwaangelinta ee daryeelka guriga. Sidoo kale waxay kaa caawin karaan shaqo raadinta.

**Wax badan ka ogow barnaamijka oo isdiiwaangeli.**

1. La xiriir Comagine si aad u bilowdo geedi-socodka codsiga.
2. Buuxi foomamka hubinta sooyaalka.
3. Aad hanuunin.
4. Soo gudbi xirmada codsigaaga.
5. Hel iimayl wata warqad soo dhawayn ah iyo lambarka bixiyaha.
6. Dhammaystir tababarka bilaashka ah ee shaqaalaha cusub.
7. Samayso akoon si aad shaqo u hesho.
8. Hel oggolaanshaha shaqada. Samayso akoon si aad ula socoto saacadaha shaqo.
9. Bilow shaqada taariikhda lagu heshiiyay.

**Ma ogtahay?** Waxa kale oo aad codsan kartaa inaad noqoto Shaqaalaha Daryeelka Guriga, Shaqaalaha Taageerada Gaarka ah iyo Tababaraha Shaqo ee Shaqaalaha Taageerada Gaarka ah. Waxaa lagugu qori karaa dhammaan doorarka isku mar.

**Wax badan ka ogow tallaabo kasta adoo ka bilaabaya bogga 2.**

Oregon Home Care Commission

**Shaqada muhiimka ah waxay ka bilaabataa halkan.**
Codso Hadda: OregonHomeCareJobs.com

## Sida loo noqdo

# Kaaliyaha Daryeelka Gaarka ah

Macluumaad dheeri ah oo tallaabo-tallaabo ah

**Hubi iimaylkaga marar badan, oo ay ku jiraan spamka iyo galka qashinka. Waxaad heli doontaa farriimaha:**

- Weydiiso inaad qaado tallaabo si aad u sii wadato codsiga
- Inaad wadaagto macluumaad ku saabsan tallaabooyinka xiga
- Lagaaga dalbanayo macluumaad dheeri ah oo adiga kugu saabsan

## 1 Bilow geedi-socodka codsiga

La xiriir Comagine, oo ah hay'adda maamusha diiwaangelinta Kaaliyaha Daryeelka Gaarka ah. Ha ogaadaan inaad doonayso in aad codsato. Isticmaal foomka macluumaadka xiriirka ee ku jira mareegtooda, iimayl u dir ama wac.

Waxaad ka heli doontaa iimayl ay ku jiraan macluumaadka baaritaanka sooyaalka si aad u bilowdo geedi-socodka codsigaaga.

U sheeg shirkadda Comagine haddii aad jeclaan lahayd in adeegyada laguugu turjumo afkaaga hooyo.

## 2 Buuxi foomamka hubinta sooyaalka

Buuxi foomka codsiga hubinta sooyaalka. Kadibna iimayl, fakis ama boosto ahaan ugu soo dir foomka Comagine oo wata nuqulka aqoonsi ay dowladdu bixisay iyo sawirkaaga teesaraha waa inuu ku yaalo aqoonsigaaga.

Iimayl ayaad ka heli doontaa ORCHARDS. Kani waa nidaamka loo isticmaalo hubinta sooyaalka. .imaylku wuxuu ku siin doonaa tallaabooyinka loo maro baaritaanka sooyaalkaaga.

**Tan waxaa lagu samayn karaa oo keliya onlayn** iyada oo loo marayo degelka ORCHARDS.

**Muhiim ah: Waa inaad marto hubinta sooyaalka toddobo maalmood gudahooda kadib marka aad hesho iimaylka.** Haddii aad u baahan tahay inaad hesho faraha waxaad haysataa 21 maalmood inaad ku dhammayso tallaabadaas. Haddii aad ku dhammayn tillaabooyinka wakhtiga la siiyay, waxaad u baahan doontaa inaad mar kale bilowdo hawsha. Waxay qaadataa saddex ilaa lix toddobaad inaad u hesho natiijada baaritaanka sooyaalkaaga.

## 3 Booqo hanuuninta

Waxaa jirta jihayn loogu talagalay Hawlwadeenka Daryeelka Gaarka ah ee cusub. **Jihaynta waa mid fool-ka-fool ah**. Waa lix saacadood. Si aad isu diiwaangeliso, booqo Xariirka Waxbarashada Carewell.

**Waxaad aadi kartaa hanuuninta waxaad akhriyi kartaa hagaha inta uu socdo baaritaanka sooyaalkaaga.** Hanuunintu waxaa loo tixgeliyaa mid la dhammaystiray marka aad imtixaanka gasho oo aad shahaadada u dirto Comagine.

Muhiim ah: **Hanuunintu waa in lagu sameeyaa 90 maalmood kahor diiwaangelinta** (tallaabada 5).

## 4 Soo gudbi xirmada codsigaaga

Buuxi foomamka ku jira xirmada codsigaaga. Waa inaad soo raaciso nuqulka dukumiintiyada taageeraya codsigaaga ee saxda ah foomka I-9. U gudbi xirmada shirkadda Comagine iimayl ama boosto ahaan.

## 5 Iimaylka ama boostada

Kadib markaad dhammaystirto tallaabooyinka 1-aad ilaa 4-aad, warqad soo dhaweyn ah ayaad ku heli doontaa iimaylka oo uu wehliyo lambarka adeeg-bixiyaha Lambarkan wuxuu kuu saamaxayaa inaad u shaqeyso Kaaliyaha Daryeellka Gaarka ah ahaan.

## 6 Dhameystir tababarka shaqaalaha cusub

Isku diiwaangeli fasallada tababarka bilaashka ah ee ku jira Degelka Waxbarashada ee Carewell. Waxay yihiin online.

Muhiim ah: **Waa inaad ku dhameysato tababarka 120 maalmood gudahooda markaad hesho lambarkaaga daryeel bixiyaha.** Haddii aadan samayn, nambarku hadda ma shaqaynayo oo waa inaad mar kale is-diiwaangelisaa.

Shaqada waad bilaabi kartaa inta aad waxbarashada dhammaynin.

## 7 Samee akoonkaaga si aad shaqo u hesho

Ka samee akoon bogga shaqada ee Carina. Tani waa meesha aad la jaan qaadi karto dadka raba inay kiraystaan taageerada daryeelka guriga.

## 8 Hel oggolaansho si aad u shaqayso oo akoon samayso si aad ula socoto saacadahaaga shaqo

Qof kasta oo aad taageerto waa inaad oggolaansho u haysato.

Haddii aad hesho qof u baahan taageero adoo u marayo Carina ama aad horay qofka u taqaanay, waxaad kala shaqayn doontaa Comagine inuu qofkaasi kuu soo diro foomamka oggolaanshaha ee la iska rabo.

Waxaad sidoo kale buuxin doontaa foomamka W-4 ee dawladda iyo gobolka ee loogu talagalay qof kasta oo aad taageerto marka aad marayso tallaabadan.

Marka aad hesho oggolaanshaha ugu horreeya, tilmaamo aad ku samaysato akoono aad kula socoto wakhtiga iyo biilasha ayaad ka heli doontaa Nidaamka Diiwaangelinta Wakhtiga Shaqo ee Adeeg-bixiyaha ee Oregon. Wa sida aad wakhtiga kula socon karto oo aad ku heli karto mushaarka shaqada aad qabatay. Oggolaanshaha inaad shaqayn karto ayaa ka soo muuqan doona gudaha nidaamka PTC.

## 9 Bilow inaad shaqayso taariikhda lagu heshiiyay

Taageer dadka laguu oggolaaday inaad kula shaqaso gurigooda iyo bulshadooda dhexdooda.

La soco liiska hawlaha la ansixiyay ee aad ka heli doonto qofka aad la shaqaynaysid. Gali saacadahaaga nidaamka Qabashada Wakhtiga Bixiyaha ee Oregon.

**Shaqada muhiimka ah waxay ka bilaabataa halkan.**

Codso Hadda: OregonHomeCareJobs.com

Bixiyaha daryeelka guriga ee diiwaangashan ahaan, waxaad hadda heli kartaa **shahaadada horumarinta xirfadeed** ee ka socota Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon si loo kordhiyo mushaarkaaga saacadlaha ah.

Waxaad heli kartaa dukumeentigan luqado kale, daabacaad waaweyn, qoraal indhoolayaasha (braille), ama qaab kale oo aad doorbidayso, dhammaan bilaash. Iimayl udir Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon ohcc.customerrelations@odhsoha.oregon.gov ama wac (877) 624-6080. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaannada relay.

100-1098200_4PCA (09/2025) Somali